# Hara ngākau kino

# Dambiga Nacaybka

## Guudmarka Waraaqda La-talinta

## KU SAABSAN DOKUMENTIGAN

Kani waa guudmarka Warqadda La-talinta ee Te Aka Matua o te Ture | Dib-u-eegidda Guddida Sharciga ee sharciga dambiga nacaybka. Wuxuu sheegayaa macluumaad ku saabsan sharciga ku aaddan dambiga nacaybka wuxuuna su'aalo ka keenayaa waxyaalaha aanu tixgalin doono dib-u-eegistayada.

## GUDBINTA FARRIIN

Waxaanu rabnaa inaanu aragtidiina ogaano. Warcelintiinu waxay naga caawin doontaa inaanu talo ka siino Dawladda sharciga dambiga nacaybka. Waxaad noogu sheegi kartaa aragtidaada inaad noo soo gudbiso farriin. Khasab ma aha inaad ka jawaabto su'alaha guudmarkan oo dhan. Soo gudbinta farriintu waxay xirmaysaa 5gd ee 13 Maarso 2025.

Waxaad ku soo gudbin kartaa farriinta adigoo:

- Ku buuxinaya foomka farriin gudbinta websaytkayaga: https://www.lawcom.govt.nz/our-work/hate-crime;
- iimeyl noogu soo diraya hate.crime@lawcom.govt.nz; ama
- waraaq noogu soo hagaajinaya: Hate crime, Law Commission, PO Box 2590, Wellington 6140.

Haddii ikhtiyaaradaasi aadan heli karin ama aad jeclaan lahayd in gudbinta farriinta lagaa caawiyo, fadlan nagula soo xiriir labadan midkood:

- adigoo iimeyl noogu soo diraya hate.crime@lawcom.govt.nz;
- adoo naga soo wacaya 0800 832 526; ama
- adigoo isticmaalaya Adeegga Gudbinta New Zealand haddaad maqal la'dahay, maqalku kugu adag yahay, maqalka iyo araggaba la'dahay, hadalka naafo ka tahay ama hadalku kugu adag yahay. Websaytka Adeegga Gudbintu waa kan: https://www.nzrelay.co.nz/index.

Dadka qaar waxa dhici karta inay ka qiiroodaan ama ka marooradillaacaan gudbinta farriinta. Haddaad rabto inaad gudbiso farriin, waxa dhici karta inaad rabto in la diyaariyo qof taageera si uu kuu caawiyo. Haddaad xanaaqsan tahay ama marooradillaacsan tahay, waxaad sidoo kale wici kartaa ama farriin u diri kartaa

1737. Kani waa adeeg khad oo bilaash ah oo diyaar ah 24-ka saac maalintii. Waxaad la hadli doontaa ama farriin u diri la-taliye tababaran. Adeegga waxa bixinaya Whakarongorau Aotearoa | New Zealand Telehealth Services.

## MAXAA KU DHACAYA FARRIINTA AAD GUDBISO?

Haddaad farriin noo soo gudbiso, waxaanu:

- ku samayn farriinta dib-u-eegis; oo
- aanu farriinta ku darsan diiwaanadayada rasmiga ah.

Sidoo kale waxaanu:

- tixraaci karnaa farriintaada wixii daabacaado aanu soosaarayno;
- ku soo qori karnaa farriintaada websaytkaaga; iyo
- u isticmaali karnaa farriintaada inaanu ku horumarino shaqadeena dib-u-eegisyada kale.

Wixii macluumaad dheeraad ah, ka booqo websaytkeena halkan: https://www.lawcom.govt.nz/have-your-say/making-a-submission/.

### Ku soo qorista farriimahaaga websaytkeena ama daabacaadaheena kale

Waxaad codsan kartaa in aanaan ku qorin magacaaga ama wixii macluumaad kale lagugu aqoonsan karo farriintaada. Sidoo kale waxaad na waydiisan kartaa in aanaan daabicin qaybaha kale ee farriintaada (tusaale ahaan, macluumaadkaaga xasaasiga ah iyo shakhsi ahaaneed).

Haddaad tan codsato, ku soo daabici mayno faahfaahinta ama qaybo farriintaada ka mid ah websaytkeena ama daabacaadaheena. Haddii *aadan* samayn codsi noocan ah, waxa dhici karta inaanu daabacno farriintaada oo dhan ama qayb ka mid ah.

### Codsiyada macluumaadka rasmiga ah

Macluumaadka ay hayaan Guddida Sharcigu waxa qabanaya Xeerka Macluumaadka Rasmiga ah ee 1982. Haddaanu helno codsi macluumaad ay farriintaadu ku jirto lagu rabo, waxa waajib ah inaanu tixgalino inaanu u fasaxno. Markay timaad qiimaynta haddii la nooga baahan yahay inaanu fasaxno farriintaada, waxaanu xisaabta ku darsan doonaa wixii codsi aad samaysay ee ku aaddan inaanaan macluumaadka ku

daabicin websaytkayaga ama daabacaadahayaga iyo sabab kasta oo aad codsigaas ku salaysay. Sidoo kale waxaanu isku dayi inaanu kula tashano.

## Xeerka Asturnaanta 2020

Macluumaadka la siiyo Guddida Sharciga waxa qabanaya Xeerka Asturnaanta 2020. Farriintaada waxa ku jiri kara macluumaad shakhsi ahaaneed. Waxaad xaq u leedahay inaad hesho ood saxdo macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed.

## GUUDMARKEENA (CUTUBKA 1AAD)

1. Guddida Sharcigu waxay dib u eegaysa sharciga ku aaddan dambiga nacaybka ee Aotearoa New Zealand. 'Dambiga nacaybku' wuxuu ka dhigan yahay habdhaqan kaasoo:
    - marka horeba dambi ah sharciga New Zealand; iyo
    - loo fuliyey nacayb ama cadaawad loo qabo koox dad ah oo isku mid ah (tusaale ahaan, qoomiyad, midab, waddanka qofku ka soo jeedo, diin, jinsi, aqoonsi jinsi, doorasho jinsi, da' ama naafonimo).
2. Sida sharci wakhtigani dhigayo, waxa dambiilaha nacaybka ku qaaday ayaa xisaabta lagu darsadaa marka la xukumayo. Guddida Sare ee Waraysiyada weeraradii argagixiso ee lagu qaaday labada masjid ee Christchurch (Meelo muslimiintu wax ku caabudaan) ee dhacay 15 Maarso 2019 ayaa ku taliyey in la sameeyo shuruuc dambiyada nacaybka ah oo cusub. Dib-u-eegistani waxay tixgalinaysaa bal haddii ay jiraan dhibaatooyin ka jira sharciga hadda jira, hadday ka jiraanna, sida sharciga looga sii wanaajin karo. Tan waxa ka mid noqon kara samayn shuruuc dambiyada nacaybka ah oo cusub, siday ku talinayaan Guddida Sare. Dib-u-eegistu ma tixgalinayso dambiga nacaybka.
3. Ujeedada Warqadda La-talinta iyo dokumentigan guudmarka waa in aragtida dadwaynaha la dhagaysto. Farriimaha aanu helno waxay naga caawin doonaan inaanu dejino soo jeedino dib-u-habayn lagu samayn karo. Marka dib-u-eegistan dhammaadka tahay, waxaanu qorshaynay inaanu kala hadalno khubaro macquulnimada isbeddelada la soo jeediyey ee sharciga. Waxaanu qorshaynay inaanu warbixin siino Wasaaradda Caddaaladda bartamaha 2026.

## DAMBIGA NACAYBKA IYO SAAMAYNTIISA (CUTUBKA 2AAD)

4. Dambiga nacaybku wuxuu diiradda saaraa aqoonsiga dhibbanaha. Dadka qaar waxay sheegaan in diirad-saariddan aqoonsigu keento dhaawac maskaxeed oo dheeraad ah — oo ku yimaadda dhibbanaha iyo xubnaha kale ee bulshada dhibtu gaartay kuwaasi oo sidoo kale dareemi kara in la handaday ama la beegsaday. Dadka qaar waxay ku doodi karaan in dambiga nacaybku sidoo kale ku keeno waxyeelo bulshada guud isagoo ka dhiga dadku inay dareemaan inay kala qoqoban yihiin oo aysan isku xirnayn.

5. Wax badan kama ogin dambiga nacaybka ee Aotearoa New Zealand. Ilaa 2019, Ngā Pirihimana o Aotearoa | Bilayska New Zealand wuxuu ururiyey xog ku saabsan dambiyo la sheegay oo dhibbahaha ama qof kale rumaysan yahay inuu dambi nacayb ahaa. 2023-kii, waxa jiray 5,019 dambiyo nacayb ah oo la soo sheegay (0.9 boqolkiiba dhammaan dambiyadii la soo sheegay). Dambiyada ugu badan waxay ahaayeen handadaad, dambiyada nidaamka dadwaynaha ah (sida habdhaqan rabshad ah), ficillo loogu talogalay inay dhaawac, iyo waxyeelo hanti keenaan. Sifooyinka inta ugu badan la beegsaday waxay ahaayeen qoomiyadda ama sirka, waxaana ku xigay doorashada jinsiga, diinta iyo aqoonsiga jinsiga. Ilaa 2021, 14- 18 boqolkiiba dambiyada nacaybka ee la soo sheegay waxa la baaray ilaa heer ay jireen caddayn ku filan oo qofka lagu soo dacweeyo dambi oo Bilayskuna uu go'aansaday inuu tallaabo qaado. Kuwan, qiyaastii kala-bar waa la maxkamadeeyey.

| |
|---|
| **Su'aasha 1aad: Ma jirtaa wax aad jeclaan lahayd inaad nooga sheegto waxa uu yahay dambiga nacaybka ee ka dhacaya Aotearoa New Zealand iyo saamayntiisa?** |

## TIXGALINAHA MUHIIMKA AH EE DIB-U-HABAYNTA (CUTUBKA 3AAD)

6. Waxaanu aqoonsannahay tixgalino muhiim ah oo naga caawin doona inaanu ka fekerno bal haddii dib-u-habayn sharci loo baahan yahay. Tixgalinahan waxay sidoo kale naga caawin doonaan qiimaynta ikhtiyaarada dib-u-habaynta.

### Baahida in loola dhaqmo dambiga nacaybka si adag marka loo eego dambiyada kale.

7. Shuruucda dambiyada nacaybku waxay ula dhaqmaan dambiyada nacaybka si adag marka la eego dambiyada kale. Sababaha arrintan ula xiriirto bal haddii dib-u-habayn sharci loo baahan yahay. Waxay noqon kartaa sharcigeena oo aan si ku filan si adag ula dhaqmin dambiyada nacaybka.

8. Waxa jira afar sababood oo sida badan la sheego marka la eego sababta ay tahay in dambiga nacaybka si ka adag dambiyada kale loola dhaqmo.

   - dambiga nacaybku wuxuu keenaa noocyo kale oo waxyeelo ah marka loo eego dambiyada kale;

- dambiilayaasha dambiga nacaybku way ka dambi badan yihiin dambiilayaasha kale.
- sharcigu waa inuu diro farriinta ah in dambiga nacaybku yahay qalad halis ah; iyo
- in loogu ciqaabo dambiga nacaybka qofka si daran waxay ka dhignaan doontaa in dadka dambiga nacaybka galayaa yaraadaan (in kastoo ay jiraan caddayn ah in ciqaabta daran aysan dadka ka joojin dambiga).

## Goorta ay habboon tahay samaynta shuruuc dambi oo cusub?

9. Dib-u-eegistani waxay eegaysaa bal haddii loo baahan yahay samaynta shuruuc dambiga nacaybka ah oo cusub. Hagitaanka dawladdu wuxuu sheegayaa in shuruucda dambiyada ay kaliya tahay in la sameeyo haddii sabab fiican loo hayo. Habdhaqan horeyba sharcigu dambi uga dhigay waa in kaliya dambigiisa la sii kordhiyo haddii lagu gaarayo ujeedo dheeraad ah oo sharciga wakhtigan yaala aan lagu gaarin karin. In qofka dambi lagu helo waxay ku yeelan kartaa saamayn halis ah qofka, dawladdana kharash badan ayey ugu kici kartaa.

## Ngā tikanga

10. Guddida Sharcigu waxa waajib ah tixgalin siiso te ao Māori (adduunka Māori) markay talobixinteeda soo jeedinayso. Tan waxa ka mid ah tikanga, oo ah nidaam qiyam iyo mabaadii' oo lagu maamulo xiriirada ka jira te ao Māori. Ka fekeridda tikanga waa qayb samaysan oo sharci-samaynta hagaagsan ah Aotearoa New Zealand.
11. Cilmibaaristayadu waxay sheegtay tikanga inaysan lahayn tibaax la mid ah oo u dhiganta dambi nacayb ah. Hase yeeshee, waxaan tixgalinay isku ekaanshaha ka dhexeeya dambiga nacaybka iyo tibaaxaha tikanga ee hara, kanga iyo kōruhu.
    - Hara waxa lagu sharraxay ficil arbusha caddaaladda ama sharciga.
    - Kanga iyo kōruhu labaduba waa hara halis ah. Kanga waxa lagu sharraxay aflagaado, oo habaaridda qofkuna ku jirto. Kōruhu waxa

lagu sharraxay sababista dhaawac ama waxyeelo iyadoon la dareemin jixinjix ama aysan jirin sabab fiican oo falka loo gaysto.

12. Fikradahani waxay sheegayaan in dambiga nacaybka loo tixgaliyo qalad wayn marka la joogo tikanga.

## Te Tiriti o Waitangi | Heshiiska Waitangi

13. Heshiiska Waitangi waa asaaska dawladda Aotearoa New Zealand waana in la tixgaliyo marka laga fekerayo beddelista sharciga. Caqabadda na hor taalaa waa sida aanu isku waafajinayno waajibyaada Heshiiska Dawladda iyo arrintan hadda taagan, oo kaliya lagu fiirinayo sharciga dambiga nacaybka. Aragtidaada arrintan waa soo dhawaynaynaa.

14. Tusaale ahaan, mid ka mid ah waajibaadyada Dawladda waa in la ilaaliyo ku dhaqanka tino rangatiratanga. Tani waxay u baahan tahay in Dawladdu u oggolaato Māori inay u maamushaan arrimahooga sida iyaga u habboon. Way jiri karaan qaabab ka fiican oo bulshooyinka Māori uga qaybgali karaan arrimaha dambiga nacaybka. Dawladda waxa waajib ka saaran yahay inay wax ka qabtaan faraqa u dhexeeya Māori iyo dadka reer New Zealand ee kale. Māori-gu aad ayey ugu badan yihiin dhammaan heerarka nidaamka caddaaladda, oo ay ku jiraan dambiilayaasha dambiga nacaybka lagu eedayo. Halista dambi aanay ciddu lahayn dusha laga saarayo waxay tilmaami kartaa arrin ka dhan ah soosaaridda shuruuc dambiyo nacayb oo gaar ah.

## Waajibaadyada xuquuqda aadanaha

15. Dib-u-habaynta sharcigu waa inay waafaqsan tahay waajibaadyada xuquuqda aadanaha ee Aotearoa New Zealand.

16. Dadka qaar waxay u qabaan shuruucda dambiga nacaybka in loo baahan yahay si loo oofiyo waajibyaada xuquuqda aadanaha ee caalamiga ah. Waxay u dhawdahay in sharcigeenu uu horeyba u oofiyey waajibaadyadan, maadaama uu farayo maxkamadaha inay tixgaliyaan waxa keenaya nacaybka marka qofka la xukumayo.

17. Qaar kale waxay sheegaan in shuruucda dambiyada nacaybka ay jabiyaan xuquuqda aadanaha, oo ay ku jiraan xuquuqda:

- xorriyadda fekerka (sababtoo ah shuruucda dambiyada nacaybku waxay dambiilaha ku ciqaabaan rabitaankiisa iyo wuxuu aaminsan yahay).
- xorriyadda hadalka iyo xiriirka (sababtoo ah waxyaalaha dambiiluhu dhahay ama xiriirka uu dadka kale la leeyahay waxa dhici karta inay horseeddo ku dhiirgasho nacayb oo ay kordhiso muddada xukunka ee qofka lagu xukumo); iyo
- sinnaanta (sababtoo ah dhibbanayaasha iyo dambiilayaaha dambiga nacaybka waxa loola dhaqmaa si kala duwan marka la eego dhibbanayaasha iyo kuwa dambiga ka galay).

18. Xuquuqdan waa la xaddidi karaa haddii sababo fiican loo hayo. Te Kōti Pīra | Maxkamadda Racfaanka ayaa sheegtay xaddidaadaha uu saaray xuquuqda xorriyadda fekerka iyo hadalka sharciga dambiga nacaybka ee Aotearoa New Zealand cududaar ayey leeyihiin, marka la eego ujeedooyinka muhiimka ah ee sharciga dambiga nacaybka.

## Waa maxay sifooyinka ay ilaalinayaan shuruucda dambiga nacaybka?

19. Waxaanu ka fekeraynaa waxay yihiin sifooyinka ay ilaalinayaan shuruucda dambiga nacaybka ee Aotearoa New Zealand. Tani waxay naga caawin doontaa go'aaminta haddii ay tahay inaanu isbeddelo ku samayno sharciga iyo sida isbeddeladu u ekaan doonaan.

20. Waxaanu u baahan doonaa inaanu ka fekerno:
    - sida ay tahay heerka halista dambiga nacaybku uu saamayn karo koox dad ah;
    - waxay tahay nooca cadaawadda ee ku waajahan kooxdu; iyo
    - haddii sharciga dambiga nacaybku yahay sida ugu wanaagsan ee loola tacaalo dambiga.

21. Waddanka dibaddiisa, waxa jiray doodo ku saabsan bal haddii sifooyinka qaar, sida jinsiga iyo da'da ay tahay in lagu daro. Tusaale ahaan, waxa jiray aragtiyo kala duwan oo laga qabay bal haddii sharciga dambiga nacaybka uu yahay sida ugu fiican ee lagaga jawaabi karo walaacyada ku saabsan dambiga ka dhanka ah haweenka iyo dadka waayeelka ah.

22. Sida sharciga hadda jiraa dhigayo, wixii ah "sifo guud oo waaraysa" waa la ilaaliyay. Haddaynu ka fekerno qaab cusub, sida shuruuc dambiga nacaybka ah oo gaar ah, in laga soosaaro Aotearoa New Zealand, waxaynu u baahan doonaa go'aaminta sifooyinka la ilaalinayo kuwa ay yihiin. Shuruucda dambiyada nacaybka waxay kaliya ilaaliyaan sifooyin gaar ah.

23. Inta ka hartay guudmarka, ugu yeedh sifooyinka uu sheegay sharciga dambiga nacaybku 'sifooyinka ilaashan'.

**Su'aasha 2aad: Sidee ayeynu ugu ilaalin karnaa waajibyada Dawladda ee hoos yimaadda Te Tiriti o Waitangi | Heshiiska Waitangi dib-u-eegistan?**

**Su'aasha 3aad: Waa maxay sifooyinka ay ilaalinayaan shuruucda dambiga nacaybka?: Sabab?**

**Su'aasha 4aad: Maxaad u malaynayaa tixgalinaha muhiimka ah ee dib-u-habaynta ee aynu ku aqoonsannahay dib-u-eegistan?**

## SIDEE DAMBIGA NACAYBKA WAX LOOGA QABTAY NIDAAMKA CADDAALADDA DAMBIYADA HADDA? (CUTUBKA 4AAD)

### Sharciga hadda jira

24. Sida sharciga hadda jiraa dhigayo, maxkamaddu waxay tixgalisaa waxa kallifay nacaybka markay xukumayso dambiile. Xeerka Xukumiddu wuxuu sheegayaa maxkamadda xukunka ridaysaa waxa waajib ah inay tixgaliso waxa kallifay nacaybka haddii:

> ... dambiiluhu uu u galay dambiga qayb ahaan ama gabi ahaanba inuu cadaawad u hayo koox dad ah oo leh sifo guud oo waaraysa sida qoomiyad, midab, waddanka qofku ka yimi, diin, aqoonsi jinsi, doorashada jinsi, da', ama naafonimo; iyo
>
> (i) ay cadaawadda ugu wacan tahay sifada guud; iyo
>
> (ii) dambiiluhu rumaysnaa in dhibbanuhu uu sifadaas lahaa: ...

25. Kallifidda nacaybku waa 'xaalad uga sii darta'. Tani waxay ka dhigan tahay inay horseedi karto xukun ka sii daran, laakiin ma kordhiso ciqaabta ugu badan ee dambiga. Waxay khusayn kartaa dambi kasta.

26. Xaaladda uga sii darta dambiga nacaybku waa mid ka mid ah xaaladaha faraha badan ee maxkamaduhu xisaabta ku darsadaan markay xukumayaan dambiile. Xaaladaha uga sii dara ee kale waxa ka mid ah xadgudubka la galo ama lagu hanjabo ama isticmaalka hub, axmaqnimo gaar ah marka dambiga la galayo iyo nuglaanshaha dhibbanaha (tusaale ahaan, da'diisa ama caafimaadkii dartii).

## Aqoonsiga, diiwaangalinta iyo baarista dambiga nacaybka.

27. Sida sare ku xusan, Bilaysku hadda waa diiwaangaliyaan dambiyada nacaybka ee la soo sheego. Sidoo kale waxa uu sameeyey hagitaan iyo tabobar la siiyo saraakiisha bilayska oo ku saabsan sida loo aqoonsado, diiwaangaliyo oo loo baaro dambi nacayb. Marka dambi nacayb oo la soo sheego la baarayo, Bilaysku waxay go'aansadaan siday u jawaabayaan. Mararka qaar ma jiri doonto caddayn ku filan oo qofka maxkamad lagu keeno. Mararka qaar waxyaalo kale oo baddiil ah, sida digniin, ayaaba ku habboonaan karta.

## Maxkamadaynta dambiga nacaybka

28. Go'aanka ku maxkamadaynta qof dambi waxa soo ooga dacwad-ooge. Dambiyada nacaybka intooda badan waxa soo ooga dacwad-oogayaasha Bilayska. Dambiyada nacaybka ee halista badan waxa soo ooga dacwad-oogayaal gaar ah oo Dawladdu Qandaraas siisay. Dambi waxa kaliya la soo oogaa haddii ay jirto caddayn ku filan oo danaha dadwaynuhu dhigayo oogisteeda. Xaaladaha uga sii dara (sida waxa dambiile nacaybka ku kallifay) ayay dhici kartaa in xisaabta lagu darsado marka go'aaminta haddii danaha dadwaynuhu uu dhigayo dacwad-oogis.

29. Dacwad-ooguhu wuxuu isku halleeyaa saraakiisha booliska si uu caddayn uga bixiyo waxa kallifay nacaybka. Waxa kallifa nacaybka waxa dhici karta inaan lagu soo hadal qaadin xukunka haddaan caddayn ku filan loo haynin.

## Xukumidda dambiilayaasha dambiga nacaybka

30. Haddii eedaysanaha dambiga lagu helo, waxa waajib ah in maxkamaddu xisaabta ku darsato waxa kallifay nacaybka oo ah xaalad uga sii darta marka eedaysnaha la xukumayo. Mararka qaar maxkamaddu waxay go'aansan doontaa dambi inuu ahaa mid nacayb kallifay iyadoo eegaysa caddaynta dacwadda ama xaqiiqooyinka ay ku heshiiyeen dacwad-oogaha iyo

eedaysanaha. Haddii eedaysanaha iyo dacwad-ooguhu aysan ku heshiin wixii dhacay, dacwad-ooguhu wuxuu u baahan karaa inuu caddayn dheeraad ah keeno.

31. Maxkamaduhu si ballaaran ayay u fasirteen xaaladda uga sii daraysa dambiga nacaybka. Sida badan waxay khusayn doontaa haddii dambiiluhu muujiyey cadaawad ka dhan ah dhibbanaha taasoo ku salaysan sifooyin guud. Tusaale ahaan, maxkamaduhu waxay isticmaaleen xaaladda uga sii daraysa dambiga nacaybka halka dambiiluhu ku dhahay hadalo midab-takoor ama khaniis-takoor ah dhibbanaha marka dambigu dhacayey.

32. Go'aanada maxkamadaha ee aanu helnay, qoomiyadda, midabka ama waddanka qofku ka yimid ayaa ahaa sababaha ugu badan ee adeegsiga xaaladda uga sii daraysa. Go'aamadu waxay khuseeyaan dambiyo fara badan, sida dil, weerar, cabsigalin, haysashada iyo adeegsiga walxo qarxa, dhac iyo tuugo, qaybinta daabacaado mamnuuc ah, xadgudub jinsi iyo falal argagixisonimo.

## Dhaqancelinta dambiilayaasha dambiga nacaybka

33. Ara Poutama Aotearoa | Waaxda Xabsiyadu waxay siisaa dambiilayaasha barnaamijyada dhaqancelinta. Barnaamijyadani waxay isku dayaan inay beddelaan aragtida iyo hab-dhaqanka horseeda dambiga. Sida badan waxa kaliya heli kara dambiilayaasha qiimayn kadib la ogaaday inay halis dhexe ama sare ugu jiraan inay dambiga ku noqon karaan. Dambiilayaashu sidoo kale waxay la kulmi karaan dhakthar cilmi-nafsi haddii baahiyahooda aan lagu dabooli karin barnaamijyo kooxeed.

34. Ma jiraan barnaamijyo dhaqancelin oo gaar ah oo ku aaddan dambiilayaasha dambiga nacaybka. Xabsiyadu waxay noo sheegeen inay yar tahay fursadda ay dambiilayaal ku filan oo xukun dambi nacayb gudanaya ay si ammaan ah iskugu imaan karaan. Sidoo kale waxay noo sheegeen barnaamijyada jira iyo daawaynta shakhsiga ah inay waxtari karaan dambiilayaasha dambiga nacaybka.

35. Haddii Xabsiyadu og yihiin in dambiga qofku ahaa mid nacayb kallifay, tani waxay kordhin kartaa fursadda inuu mutaysto barnaamij ama daawaynta shakhsi. Hase yeeshee, Xabsiyadu sida badan ma sheegaan haddii dambiile

galay dambi nacayb iyo haddii kale. Marka la eego dambiilayaasha halista dhexe ama sare ugu jira inay mar kale dambiga galaan, Xabsiyadu waxay u akhriyaan qoraalka xukunka maxkamadda, kaasi oo laga tixraaci karo waxa kallifay nacaybka.

## SHARCIGA JIRAA MA DHIBAATOOYIN AYUU LEEYAHAY? (CUTUBKA 5AAD)

### Muujinta in dambiga nacaybku halis yahay

36. Dadka qaar waxay aaminsan yihiin inay tahay in sharcigu diro farriin sheegaysa in dambiga nacaybku yahay dambi wayn. Sharciga hadda jira marka la eego, tani waxay ku dhici kartaa:

- xaakinka oo kaga sheega dhagaysiga maxkamad ama qo'aan xukun oo qoraal ah dambigu inuu yahay dambi nacayb;
- warbaahinta oo tabinaysa dambiga nacaybka ah; ama
- dambiilaha oo la saarayo xukun adag.

37. Hase yeeshee, dadka qaar ayaa aaminsanaan kara in sharciga hadda jiraa uusan wax ku filan ka qaban inuu dadwaynaha u sheego dambiga nacaybka iyo halista uu leeyahay. Tan waxa keenaya:

- waxa kallifaya nacaybku qayb kama aha dambiga qofka lagu soo oogayo;
- go'aanada xukunku waxba kama dhahaan haddii waxa kallifay nacaybka la tixgaliyey ama ilaa heerka uu saamayn ku yeeshay xukunka;
- maxkamadaha oon ku xukumin xukuno adag dambiyada nacaybka; iyo
- ciqaabta ugu badan ee dambi waa isku mid, ha noqdo ama yuusan noqon dambi nacayb.

### Dhiirigalinta sheegista dambiga nacaybka

38. Guddida Sare waxay ogaadeen in dambiga nacaybka aan sida badan loo sheegin Booliska.

39. Waxa jira sababo badan oo cidi ay dhici karto inaysan u sheegin dambiga nacaybka. Tusaale ahaan, waxa:

- dhici karta inaysan u haysan in dambiga nacaybku yahay mid halis ah oo Bilayska loo sheegi karo;
- qofka oon garanayn cidda dambiiluhu ahaa; ama
- iyadoo lagala kulmo ama laga hayso aragto taban Bilayska arrintaasi oo ka hor joogsata qofka inuu waxa dhacay sheego.

40. Waxaanu danaynaynaa sababta dadku aysan Booliska ugu sheegin dambiga nacaybka iyo bal haddii arrintan isbeddeshay oo ka soo raysay ilaa markii Guddida Sare ay warbixintooda soo saareen. kadib waraysigii Guddida Sare, Bilaysku waxay soo saareen tababaro iyo hagitaan loogu sheegayo saraakiisha bilayska inay u arkaan halis dambiga nacaybka.

## Hubinta in waxa kallifay nacaybka wax laga qabtay kiisaska la xiriira

41. Waxaanu danaynaynaa in bal haddii waxa kallifay nacaybka si joogto ah ay u baaraan Bilayska oo ay ku soo qaadaan dacwad-oogayaashu marka xukunka la ridayo. Isbeddelada dhawaa ee ku yimid hagitaanka iyo tabobarka Bilayska waxay caawin karaan horumarinta jawaabta booliska ee ku aaddan dambiga nacaybka, laakiin waxa dhici karta inay wali xilli hore tahay in la ogaado.

42. Sdioo kale waxaanu danaynaynaa bal haddii waxa kallifaya nacaybka lagu tixgaliyo fagaarayaasha kale ee dacwadaha maxkamadaha, sida marka maxkamadi go'aan ka gaarayso bal haddii eedaysane damiin lagu sii daynayo ama go'aanada xukumidda ee dambe ee la xiriira isla dambiilaha.

## Ururinta macluumaadka ku saabsan kiisaska dambiga nacaybka

43. Sharciga hadda jira siduu dhigayo, waxa kallifaya nacaybku dambiga kama mid aha. Tani waxay caqabad ku noqon kartaa ururinta macluumaad sax ah oo ku saabsan dambiga nacaybka ee la soo sheegay iyo natiijooyinka kiiska.

44. Bilaysku wuxuu sameeyey isbeddelo muuqdo si uu u horumariyo diiwaangalintiisa dambiga nacaybka ee la sheego wuxuuna bilaabay inuu macluumaadka dadwaynaha la wadaago. Tirada dambiyada nacaybka ee la soo sheego ee la diiwaangaliyey si joogto ah ayey u kordhaan sanad kasta.

45. Wali waxa jira galdalool ka jira dhanka maclumaadka ku saabsan waxa ku dhacaya dacwadaha dambiga nacaybka (tusaale ahaan, bal haddii dambiilaha dambiga lagu helo iyo nooca xukunka uu helayo) iyo bal haddii waxa kallifaya nacaybka xisaabta lagu darsado marka la xukumayo.

## Adeegsiga xaaladda uga sii daraysa

46. Waxaanu aqoonsannahay saddex walaac oo suurtogal ah oo ku saabsan qaabka loo dhigo xaaladda uga sii darta dambiga nacaybka iyo sida maxkamaduhu u dabbaqaan.

47. Ugu horrayn, xaaladda uga sii dartaa waxay khusaysaa haddii dambiilaha ay kalliftay gabi ahaan ama qayb ahaan *cadaawadi.* Cadaawaddu khasab ma aha inay tahay sababta ugu wayn ee dambiga. Tani waxay ka dhigan tahay xaaladda uga sii daraysaa waxay khusayn kartaa halka nacaybku ka lahaa oo kaliya door yar samaynta dambiga. Hase yeeshee, maanu helin tusaalayaal arrintan oo dhacaysa ah.

48. Marka labaad, xaaladda uga sii daraysaa waxay khusaysaa dambiga ka dhanka ah koox dad ah oo leh "sifo guud oo waaraysa". Had iyo jeer ma cadda macnaha arrintani. Tusaale ahaan, jinsigu wuxuu u muuqdaa "sifo guud oo waaraysa", laakiin haddana xaaladda uga sii daraysaa waxay si naadir ah u khusaysaa cadaawadda lagula kaco haweenka. Hubinti la'aanta ku saabsan sifooyinka xaalad uga sii darta ay khusayso waxay sidoo kale horseedi kartaa go'aano aysan dadwaynuhu filayn. Tusaale ahaan, New South Wales xaalad uga sii darta oo la mid ah ayaa la isticmaalay si loo ilaaliyo dadka la rumaysan yahay inay yihiin dambiilayaal carruur fara-xumeeyey.

49. Marka saddexaad, xaaladda uga sii dartaa waxay kaliya khusayaa haddii dambiiluhu rumaysnaa in dhibbanuhu lahaa sifo la ilaaliyey. Tusaale ahaan, khusayn mayso haddii dambiiluhu uu qoro qoraal nacayb ah oo uu ku qoro dayr dadwayne isagoon garnayn ama danayn cidda iska leh.

## Qiimaynta baahiyaha dhaqancelin ee dambiilayaasha

50. Maadaama waxa kallifay nacaybka aan lagu diiwaangelin xukunka qofka ee maxkamadeed, Guddida Sare waxay rumaysnaayeen baahida loo qabo taageerada dhaqancelin in la daayici karo. Xabsiyadu waxay u malaynayeen inay arrintani ay u dhawayd inaysan wax wayn ahayn. Taageerada dhaqancelin

sida badan waxa loo fidiyaa dambiilayaasha halista dhexe iyo sare ku jira, ayna tahay in Xabsiyadu og yihiin haddii dambiilayaashan uu kallifay nacayb maadaama ay akhriyaan qoraalka xukunkooda iyo macluumaadka kale ee maxkamadda.

51. Hase yeeshee, baahida taageerada dhaqancelin waa la daayici karaa marka la eego dambiilayaasha dambiga nacaybka qaarkood kuwaasi lagu qiimeeyey in halistu yar tahay. Waxa sidoo kale jiri kara kiisas waxa kallifay nacaybka dabiilaha aysan caddayn marka la eego qoraalka xukunka ee maxkamadda. Arrintani waxay ku adkayn kartaa Xabsiyada inay kala saaraan inuu kallifay nacayb dambiilaha halis dhexe ama sare (in kastoo arrinani wali noqon karto mid cad muddada qiimaynta iyo daawaynta).

**Su'aasha 5aad: Ma u malaynaysaa inay jiraan ceebo ku aaddan sida sharciga dambiga nacaybka ee wakhtigan ee Aotearoa New Zealand u shaqaynayo? Hadday sidaas tahay, waa maxay dhibaatooyinkani?**

## GUUDMARKA IKHTIYAARADA DIB-U-HABAYNTA (CUTUBKA 6AAD)

52. Waxa jira saddex mooddo sharci oo muhiim ah oo loo isticmaalo wax ka qabashada dambiga nacaybka waddamada dibadda:

- moodada sii adkaynta xukunka (hadda laga isticmaalo Aotearoa New Zealand);
- Shuruucda dambiyada nacaybka ee gaarka ah (ku talobixiyey Guddida Sare); iyo
- mooddada isku-dhafan ee Iskotishka, taasi oo isku darta qaybo ka mid ah moodada sii adkaynta xukunka iyo shuruucda dambiga nacaybka gaarka ah.

53. Haddaanu go'aansanno inay ceebo ka jiraan sharciga hadda jira, waxa kuwaas wax looga qaban karaa:

- horumarinta sida moodada ka sii daridda xukunka u shaqayso, iyadoo isbeddelo lagu samaynayo sharciga iyo sida loogu shaqeeyo; ama
- qaadashada mooddo sharci oo ka duwan.

54. Shuruuc dambi oo cusub waa in kaliya la sameeyaa haddii ay sababo fiican jiraan iyo haddii lagu gaari karo wax sharciga hadda jiraa ka gaabiyey. Tani waxay ka dhigan tahay waxa fiicnaan karta in lagu eego wixii dhibaatooyin ah sharciga hadda jira iyadoo la horumarinayo moodada sii adkaynta xukunka. Hadday jiraan dhibaatooyin waxba looga qaban kari waayay sidaas, waxa la tixgalin karaa qaab sharci oo ka duwan. Waxaanu raadinaynaa jawaabcelin ku aaddan labadan ikhtiyaar ee dhammaadka guudmarkan.

55. Waxaanu isku barbardhignay qaar ka mid ah meelaha muhiimka ah ee saddexda qaab sharci ee ugu waawayn shaxda hoose.

| QAABABKA SHARCI EE WAX LOOGA QABANAAYO DAMBIGA NACAYBKA | | | |
|---|---|---|---|
| | **Sii adkaynta xukunka** | **Shuruuc dambi oo gaar ah** | **qaabka isku-dhafka ee Iskotishka** |
| **Waa kuwee shuruucda dambiyada laga hadlayaa?** | Dhammaan shuruucda dambiyada | Kaliya shuruuc dambi oo gaar ah | Dhammaan shuruucda dambiyada |
| **Waa kuwee sifooyinka la ilaaliyey?** | Wixii sifooyin guud oo waara ah | Kaliya sifooyin la cayimay | Kaliya sifooyin la cayimay |
| **Miyaa waxa kallifaya nacaybka loo diiwaangaliyaa inuu qayb ka yahay dambiga?** | Maya | Haa | Haa |
| **Ma jiraa ciqaab ugu badan oo ka sarraysaa dambiga nacaybka?** | Maya | Haa | Maya |

| | | | |
|---|---|---|---|
| **Halkee qaabkan hadda lagu isticmaalaa?** | New Zealand, Australia (New South Wales, Victoria, South Australia, Tasmania iyo Northern Territory), England iyo Wales (iyadoo ay weheliyaan shuruuc dambi oo gaar ah), Canada, Northern Ireland | Australia (Western Australia iyo Queensland), England iyo Wales (iyadoo ay weheliyaan shuruuc xukun sii adkayn) | Scotland |

## HORUMARINTA MOODADA SHARCIGA EE HADDA JIRA (CUTUBKA 7AAD)

56. Qaabka sharciga ee hadda loo isticmaalo wax ka qabashada dambiga nacaybka ee Aotearoa New Zealand waxa loo yaqaan qaabka sii adkaynta xukunka. Qaabkan marka la eego, dambiilaha waxa ku kallifay nacaybka ayaa xisaabta lagu darsadaa marka la xukumayo ayuuna waxa kallifay xukunka sii adkeeyaa. Waxa kallifay nacaybku qayb kama aha dambiga, oo ciqaabta ugu badan ee dambigu isma beddesho.

### Faa'idooyinka adeegsiga qaabka sii adkaynta xukunka

57. Qaabka sii adkaynta xukunku waxay dheer tahay dhawr faa'ido qaababka sharci ee kale. Tusaale ahaan:

- wuxuu khuseeyaa dhammaan dambiyada iyo sifooyinka guud ee waaraha;
- Halista waxa dambiga kallifay waxa loo qiimeeyaa si gooni-gooni ah;
- aad ayuu waxtar u leeyahay marka la eego wakhtiga iyo kharashka maxkamadda, maadaama waxa kallifay dambiga aan loo baahnayn in laga caddeeyo maxkamadda horteeda si badanna aan muran looga keenin; iyo
- adeegsiga qaabka sharciga ee wakhtigan jirta waxay meesha ka saari kharashka iyo hubinti la'aanta dib-u-habayn sharci oo wayn.

## Qaababka loo horumarinayo qaabka sii adkaynta xukunka

58. Waxa jiri kara qaabab loo horumarin karo sida sharciga hadda jiraa u shaqeeyo iyadoo aan la beddelayn qaabka sharciga. Waxaanu rabnaa inaanu ogaano waxaad ka aaminsan tahay arrintan. Waxaanu ku sheegnay ikhtiyaarada qaar hoos.

### *Muujinta in dambiga nacaybku halis yahay*

59. Haddii sharciga jiraa uusan wax ku filan ka qabanayn soo bandhigidda in dambiga nacaybku halis yahay, qaababka wax looga qaban karo waxa ka mid noqon kara:

- shardi ka dhigidda in xaakinada xukumayaa ay ka sheegaan dhagaysi maxkamadeed oo dadwaynaha iyo warbaahinta u furan in dambigu ahaa dambi nacayb;
- shardi ka dhigidda in xaakinada xukumayaa ay sharraxaan sida waxa kallifay nacaybka uu u saameeyey xukunkooda;
- dib-u-eegidda ciqaabta ugu sarraysa ee shuruucda dambiga ee jira si loo xaqiijiyo inay daran yihiin ilaa heer ku filan inay ku jiraan waxa kallifay nacaybka dambiilaha.

### *Dhiirigalinta sheegista dambiga nacaybka*

60. Hadday jiraan caqabado hortaagan sheegidda dambiga nacaybka, wax-ka-beddelka qaabka sharciga waxa dhici karta inaysan noqon qaabka ugu fiican ee arrinta wax looga qabanayo. Ikhtiyaarada kale waxa ku jiri kara:

- olole wacyigalin dadwayne;
- soosaaridda qaabab baddiil ah oo sheegidtaan, sida adeegyada bulsheed ee sheegi kara dambiga nacaybka iyagoo ka wakiil ah dhibbanaha iyo dadka kale.

### *Maxkamadaynta dambiga nacaybka*

61. haddii waxa kallifay nacaybka aysan dacwad-oogayaashu sida la rabo u sheegayn marka xukunka, siyaabo arrintan waxa looga qaban karo waxa ku jiri kara:

- Talo ka siinta dacwad-oogayaasha Dawladdu Qandaraaska Siisay dacwad ku oogista dambiga nacaybka, si la mid hagitaanka horey loo siiyey dacwad-oogayaasha Bilayska.
- Ka dayrinta dambiyada nacaybka ee ka jira nidaamka maxkamadda. Dacwad-oogayaasha waxa loo sheegi karaa inay sheegaan haddii ay dacwad eedaysane lagu soo oogay tahay dambi nacayb. Ka dayrintu waxay ku qaadi kartaa xaakinada inay tixgaliyaan waxa kallifay nacaybka markay xukunka soosaarayaan iyo wakhtiyada kale ee la xiriira (sida marka go'aaminta bal haddii eedaysanaha damiin lagu siin karo).

### *Horumarinta macluumaadka ku saabsan natiijada dacwadaha dambiga nacaybka*

62. Haddii kiisaska dambiga nacaybka laga dayriyey nidaamka maxkamadda (sida looga hadlay hore), maxkamaduhu waxa dhici karta inay awoodaan inay Bilayska la wadaagaan macluumaadka ku saabsan kiisaskaas. Tani waxay ka caawin kartaa Bilaysku inuu u kuurgalo sida dacwad-oogayaashu sida badan u sheegayaan waxa kallifay nacaybka marka xukunka la wado iyo natiijooyinka dacwadaha dambiga nacaybka.

### *Dabbaqidda xaaladda sii adkaysa xukunka dambiga nacaybka*

63. Hadday jiraan walaacyo ku saabsan dabbaqidda xaaladda sii adkaysa dambiga nacaybka, waxa suurtogal ah in lagu xalliyo beddelista sida loo dhigayo hadalka/qoraalka xaaladda. Tusaale ahaan:
    - Hadduu jiro walaac ah in xaaladda sii adkaynta xukunka la dabbaqi karo marka nacaybku wax yar ka yahay in dambiga la sameeyo, waa la beddeli karaa si markaa ay waajib u noqoto in nacaybku uu yahay qayb muhiim ah oo ka mid ah waxa dambiilaha kallifay.
    - Hadduu jiro walaac ku saabsan sifooyinka ay ilaalisay xaaladda sii adkaynta xukunka, xaaladda waa la beddeli karaa si markaa kaliya loogu dabbaqo sifooyinka la taxay, beddelka "sifada guud ee waarta" oo kasta. Ikhtiyaar kale waa beddelista liiska tusaalayaasha sifooyinka la ilaaliyey.

- Hadday dhibaato ka jirto in xaaladda sii adkaynta xukunka kaliya lagu dabbaqayo halka dambiiluhu rumaysnaa in dhibbanuhu lahaa sifada la ilaaliyey, shardigan meesha waa laga saari karaa.

### *Dhaqancelinta dambiilayaasha dambiga nacaybka*

64. Hadday dhibaato ka jirto aqoonsiga baahiyaha dhaqancelin ee dambiilayaasha, wixii ka dayrin dambi nacayb ee ka dhaca nidaamka maxkamadaha waxa lala wadaagi karaa Xabsiyada. Xabsiyada waxa markaa lagu wargelin karaa ku helitaanada dambiyada nacaybka.

> **Su'aasha 6aad: Hadday dhibaatooyin ka jiraan sida sharciga dambiga nacaybka ee Aotearoa New Zealand u shaqaynayo, miyaa wax laga qaban karaa iyadoo laga tagayn qaabka sharciga ee hadda jirta (sii adkaynta xukunka)? Hadday sidaas tahay, sidee?**

## MOODOOYINKA SHARCI EE KALE EE WAX-KA-QABASHADA DAMBIGA NACAYBKA (CUTUBKA 8AAD)

65. Haddaanu go'aamino inay dhibaatooyin ka jiraan qaabka sii adkaynta xukunka oo aan si fudud loo xallin karin, waxaanu ku talin karnaa beddelista qaabka sharciga. Waxaanu danaynaynaa jawaabcelin ku saabsan laba qaab sharci oo kale kuwaasi oo loo isticmaalo dambiga nacaybka ee waddamada dibadda (kuwaasi oo kalidood la qaadan karo ama la garab wadi karo qaabka sii adkaynta xukunka):
    - Shuruucda dambiyada nacaybka ee gaarka ah (ku talobixiyey Guddida Sare); iyo
    - qaabka isku-dhafka ee Iskotishka, taasi oo isku darta qaybo ka mid ah qaabka sii adkaynta xukunka iyo shuruucda dambiga nacaybka gaarka ah.

### Shuruucda dambiga nacaybka ee gaarka ah

66. Sida qaabkan dhigayso, waxa kallifay nacaybku wuxuu qayb ka yahay dambiga qofka lagu soo oogo. Waxa waajib ah in laga caddeeyo maxkamadda horteedda (waa haddii eedaysanuhu uu qiran waayo). Haddii eedaysanaha dambiga lagu xukumo, waa inay qoraalka xukunka maxkamadda ku caddahay iyo wixii warbixin warbaahin ah in dambigu ahaa dambi nacayb, maadaama

waxa kallifay nacaybka uu dambiga qayb ka ahaa. Waxa kallifay nacaybka waxa sidoo kale la galiyaa diiwaanada dambiyada ee dambiilaha.

### *Waa maxay shuruucda dambiyada ee ay tahay in laga hadlo/sheego?*

67. Dambiyada dambiga nacaybku sida badan waxay ku salaysan yihiin shuruuc dambi oo jira (sida weerar). Shuruucdan dambi ee jira waxa loo yaqaan 'asaaska dambiga'. Sharciga dambiga nacaybka wuxuu la mid yahay asaaska dambiga marka laga reebo in dacwaddu ay tahay waajib inay muujiso dambiilaha inuu kallifay nacayb. Shuruucda dambiga nacaybka waxay leeyihiin ciqaab ka badan dambiga asaaska ah.

68. Shuruucda dambiyadu waxa waajib ah inay gaar yihiin, si ay markaa dadwaynaha ugu caddaato inaan habdhaqanka la oggolayn. Sharci dambi oo kasta sidoo kale waa inuu leeyahay ciqaabtiisa ugu sarraysa. Arrintan darteed, shuruucda dambiga nacaybka kaliya waxay ka hadlaan shuruucda dambiyada asaaska ah oo tiro ahaan kooban iyo sifooyinka la ilaaliyey.

69. Haddaanu ku talino soo saarista shuruuc dambiga nacaybka oo gaar ah, waxaynu u baahan doonaa inaynu tixgalino waxay yihiin dambiyada ay tahay in lagu dabbaqo. Qaar ka mid ah waxyaalaha aynu u baahan karno inaynu ka fekerno:

- sida uu badanaa dambi asaas ah u noqon karo mid uu nacayb kallifay; iyo
- bal haddii ciqaabta ugu sarraysa ee dambiga asaaska ah ay horeyba ugu filnayd ciqaabta dambiyada nacaybka.

70. Guddida Sare waxay ku talobixiyeen dejinta shuruuc ku aaddan dambiga nacaybka ee habdhaqanka ama hadalka dambiga ah, rabitaanka gaysashada waxyeelo, cabsigalin, weerar, aarsi iyo waxyeelada u-kaska ah. Hase yeeshee, tani ka hadli mayso dhammana dambiyada nacaybka. Tusaale ahaan, Aotearoa New Zealand, burcadnimada iyo isticmaalka ama hayshada walxaha qarxa waxay ahaayeen dambiy nacayb.

| |
|---|
| **Su'aasha 7aad: Haddii shuruucda dambiga nacaybka ee gaarka ah la qaato, waa maxay dambiyada ay daboolayaan? Sabab?** |

### *Faa'idooyinka iyo khasaaraha*

71. Shuruucda dambiga nacaybka gaarka ah waxa dhici karta inay leeyihiin faa'idooyin marka la barbardhigo qaabka sii adkaynta xukunka. Tusaale ahaan, waxa:

- dhici karta inay diraan farriin xooggan oo ah in dambiga nacaybku halis yahay;
- dhici karta inay horumariyaan diiwaangalinta iyo la socodka dambiga nacaybka;
- dhici karta inay ka dhigan yihiin dambiyo badan in la baaro oo loo soo oogo inay yihiin dambiyo nacayb;
- dhici karta inay beddelaan aragtida dadka iyagoo sare u qaadaya wacyiga ku addan waxyeelada uu keeno dambiga nacaybka;
- dhici karta inay u caddaalad badan yihiin eedaysanaha, maadaama waxa kallifay nacaybka loo baahan karo in laga caddeeyo maxkamadda horteeda (waa haddii eedaysanuhu uu qiran waayo).

72. Shuruucda dambiga nacaybka ee gaarka ah waxa dhici karta inay leeyihiin khasaare. Tusaale ahaan:

- Ma daboolaan dhammaan dambiyada nacaybka. Dadka qaar ayaa u fahmi kara inaysan arrintan caddaalad ahayn.
- Waxay ka dhigi karaan oogista dambiyada qaar jiitama, kakan oo qaali ah. Eedaysanayaasha sidoo kale waxa dhici karta inay qirtaan dambiga. Oogista dacwaddu waxay u baahan doontaa in dambiga nacaybka maxkamadda horteeda laga caddeeyo, taasi oo ku lug yeelan karta caddayn badan oo laga helo dhibbanayaasha iyo markhaatiyada kale.
- Waxa kallifay nacaybka waxa dhici karta in la garanba waayo kiisaska qaar. Tusaale ahaan, dacwad-oogayaashu waxa dhici akrta inay ku soo oogaan qofka dambiga asaaska ah halkii ay kaga soo oogi lahaayeen dambi nacayb sababtoo ah eedasanaha oo qirta inuu galay dambiga asaaska ah.

- Waxa kallifa nacaybka waxa loola dhaqmi lahaa si ka adag marka loo eego xaaladaha adkaynta xukunka (sida axmaqnimo halis ah ama nuglaanshaha dhibbanaha).
- U ciqaabista dambiilayaasha si adag iyadoo laga duulayo waxa kallifay waxa dhici karta inuu jabiyo xorriyadda fekerka iyo hadalka. In baaritaan lagu sameeyo fikradaha iyo waxa tuhmanuhu rumaysan yahay sidoo kale waxay saamayn taban ku yeelan karaan xorriyadda hadalka.
- Shuruucda dambiga nacaybka waxa dhici karta in si aan loo sinnayn loogu fuliyo dadka tirada yar iyo kooxaha saboolka ah (gaar ahaan Māori, kuwaasi oo ku badan nidaamka caddaaladda dambiga, oo ay ku jiraan dambiilayaasha lagu eedeeyo dambiga nacaybka).

## Qaabka isku-dhafka ee Iskotishka

73. Sida qaabkan dhigaayo, dambi kasta waxa loo aqoonsan karaa mid 'nacayb sii adkeeyey'. Dacwad-ooguhu waxa waajib ah inuu sheego dambigu inuu ahaa mid nacayb sii adkeeyey markii eedaysanaha la soo dacweeyey iyo inay waajib tahay in maxkamadda horteeda laga caddeeyo sii adkaynta (waa haddii eedaysanuhu uu qiran waayo). Waxa kallifay nacaybka waxa xisaabta lagu darsadaa marka dambiilaha la xukumo, laakiin ciqaabta ugu badan ee dambigu isma beddesho. Xukumidda ayaa muujisa in dambigu ahaa dambi nacayb.

74. Si la mid ah moodada sharciga dambiga ee gaarka ah, moodada isku-dhafan ee Iskotishka ayaa kaliya lagu dabbaqaa sifooyinka la ilaaliyey ee la cayimay.

75. Qaabka isku-dhafka ee Iskotishka waxay dhanka faa'idada iyo khasaarabaha kala siman tahay shuruucda dambiyada ee gaarka ah. Faraqa ugu wayn ee u dhexeeya waa in:

- aysan kordhin ciqaabta ugu badan ee dambiyada nacaybka (sidaas darteed shuruucda dambiyada ee gaarka ah waxa dhici karta inay kaga fiican yihiin dhanka muujinta dambiga nacaybku inuu yahay halis);
- uu daboolo dambiyo nacayb oo dheeraad ah, maadaama lagu dabbaqo dambi kasta;
- ay ka fududahay, sababtoo ah ma samayso shuruuc dambiga nacaybka oo fara badan oo gooni ah.

76. Dhalleecayn suurtogal ah oo qaabka isku-dhafka ee Iskotishka waa inaysan uga baahnayn dacwad-oogayaasha inay ka caddeeyeen maxkamadda horteeda waxa kallifay nacaybka, maadaama ciqaabta ugu sarraysa ee sharciga sii adkaynta dambiga nacaybka uu la mid yahay sharciga aan sii adkayn dambiga.

**Su'aasha 8aad: Miyey tahay in mooddo sharci oo ka duwan, sida shuruucda dambiga nacaybka ee gaarka ah ama moodada isku-dhafan ee Iskotishka, ay tahay in laga dhaqangaliyo Aotearoa New Zealand? Sabab ama sababma?**

## Miyaa moodada sii adkaynta xukunka la sii isticmaalaya wali haddii mooddo sharci oo cusub la qaato?

77. Moodada sharciga dambiga ee gaarka ah iyo qaabka isku-dhafka ee Iskotishka labadaba waa la garab wadi karaa qaabka sii adkaynta xukunka. Haddii qaabka sharci oo cusub la qaato, waxaanu danaynaynaa bal haddii qaabka sii adkaynta xukunka ee jira la sii wadanayo sidoo kale.

78. Faa'idooyinka isticmaalidda qaabka cusub iyo qaabka sii adkaynta xukunka oo wada socdaa waa in:
    - faa'idooyinka sharciga dambiga ee gaarka ah ama qaabka isku-dhafka ee Iskotishka la dabbaqi doono;
    - sharciga sii adkaynta xukunka uu dabooli doono dambiyada ee aysan qaabka cusub daboolin.

79. Khasaaraha ugu wayn ee isticmaalidda qaabka cusub iyo waliba qaabka sii adkaynta xukunka waa inay ka dhigi doonaan sharciga mid adag. Waxa jiri lahaa baahi ah inay jiraan xeerar ku saabsan goorta sharciga sii adkaynta xukunka la dabbaqayo. Tusaale ahaan, ma waxa la dabbaqi lahaa haddii dacwad-oogista ay dacwayn kari lahayd eedaysane galay dambi nacayb oo gaar ah laakiin ay doorato inaysan sidaas yeelin?

**Su'aasha 9aad: Haddii shuruucda dambiga nacaybka ee gaarka ah ama qaabka isku-dhafka ee Iskotishka la hirgaliyo, miyaa lagu sii dhaqmayaa qaabka sii adkaynta xukunka sidoo kale?**